# Sidda Dambi ku soo Eedeyntu ay u Saameyn karto Sharcigaagga (immigration)

How Being Charged with a Crime Can Affect Your Immigration Status



Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa sidda eedaynaha dambiyaddu ay u saameeyn karaan sharcigaagga. Waxa ay ka hadashaa noocyadda kala duwan ee dambiyadda ah ee saameyn kara sharciga. Waxay wadaagtaa akhbaar ku saabsan waxa la sameeyo haddii lagu xiro.

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan ah oo Ingiriis ah ama Afaf kale ah, booqo: https://www.lawhelpmn.org/

Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

# Habraaca Dambiyadda

## Maxaa dhici ka dib kolka la i soo xiro?

### Xirid

Bilayska ayaa ku geyn saldhiga ka dibna halkaa kugu hayn muddo.

### Eedaymaha Dambiyadda

Kiis dambi oo kaa dhan ah ayaa la bilaabmi. Hadii bilaysku aysan kugu soo eedeyn dambi, waa inay ku sii daayaan.

### Qirasho

waxa aad ka hor qiran inaad dambi geystay Xaakim.

### Maxkamadeyn

Waxa aad u sheegi xaakim inaadan dambi geysan. Qareenka dowladduna waxa uu isku dayi inuu cadeeyo inaad dambi geystay. Qareenkaaguna waxa uu isku dayi inuu cadeeyo inaadan dambi geysan.

### Dambi ku helid

Xaakim ama garsoore dadweyne ayaa go'aansada inaad dambi geystay iyo in kale. Ama waxa aad ka hor qiran inaad dambi geysatay xaakim. Dambi waa lagugu heli karaa xataa haddii aadan xabsi aadin.

### Dambi ku Waayid

Xaakin ama Garsoore dadweyne ayaa go'aansada in aadan dambi gaysan. Xor baadna u noqon inaad iska baxo.

### Xukun Ridid

Ciqaabta dambi. Waxa ay noqon kartaa xabsi ama seeto dheerayn.

### Haddii Lagu soo Xiro

- Codso turjubaan.
- Dheh, "I want to remain silent." (Waxaan doonayaa inaan ka gaabsado arrinta.)
- Codso qareen. Waxa aad xaq u leedahay qareen sharciyadda dambiyada yaqaan wax kasta ha noqdee sharciga wadanka aad ku leedahay. Hadii aad danyar tahay maxkamadda ayaa ku keeni qareen bilaash ah.

### HA KA

- Jawaabin su'aalo ku saabsan sharcigaagga.
- ha oran waxba, hana saxiixin waxba hana gaarin wax go'aan ah qareen la'aan.

Barta LawHelpMN waxa ay haysaa waqad xog aruursan ah oo kula wadaagi wax badan oo ku saabsan xaquuqdaadda haddii lagu soo xiro. Gal: [lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/i-got-arrested-what-happens-now](lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/i-got-arrested-what-happens-now).

# Dambi ku soo Eedeynta & Sharcigaagga

## Degdeg qareen ula tasho!

Cid walba oo aan ahayn Muwaadin Mareykanka (U.S.) waxa ay khatar u tahay in la masaafuriyo haddii ay gaystaan noocyo dambiyadda ka mid ah. Waydii qareen dambiyada qaabilsan sidda eedaynahu ay u saameyn karaan sharcigaaga. La tasho sidoo kale qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan. La tasho qareen xataa haddii lagugu soo eedeeyo dambiyada yaryar sidda kuwa jabinta sharciyadda wadooyinka. Barta LawHelpMN waxaa ku jira liis qareemo ku caawiyin kara. Mari Kooda (QR) ama gal: lawhelpmn.org/providers-and-clinics

## Siddee ayey dambi ku soo eedeyntu u saameyn kartaa sharcigayga?

Dambi ku soo eedeynta ama ku helid dambi waxa ay waxyeeli karaan sharcigaagga, Qaar ka mid ah, oo aan kuli wada ahayni ku helidoodu ama fal-dambiyeedyaddu waxa ay macnahoodu noqon karaan:

- Inaadan awoodin inaad cusboonaysiiso noocyadda sharciyadda ee ku meelgaarka ah.
- Inaadan awoodin inaad codsato nooca sharciga ah ee aad rabto ama aad ka wareegto sharci ku meelgaar ah oo aad qaadato mid rasmi ah.
- In maxkamaddu ay bilowdo hanaan lagaaga masaafurinayo wadanka.
- Inaad xabsi ku jirto inta aad ka mudacayso masaafurinta.
- In lagu masaafuriyo.

## Dambiyada Noocyadee ayaa keeni kara dhib dhanka sharciga ah?

Haddii lagu xiro, dambi lagugu soo eedeeyo ama lagugu helo **WAX** dambi ah, waxa ay taasi kuu keeni kartaa dhibabka iyadoo hadba ku xiran sharcigaagga. Kuwaa waxaa ku jira, dambiyadda waaweyn, sidda dambiyada cid waxyeelida ah, guri jabsiga, ama musuqmaasuqa. Waxaa kaloo ku jira ka geysi dagaal qoyska dhexdiisa, ama jabin amar maxkamadeed oo amaan bixin ah.

Xataa dambiyadda yaryar waxa ay ku yeelan karaan sameeyn xun sharcigaagga. Arrintani waa dhab xataa haddii aan xabsi laguu dirin ama aadan bixin lacag badan oo ganaax ah. Tusaalooyin qaarkaa ah waxaa ku jira:

- **Gaari wadid adigoo ku sarkhaansan** daroogo ama khamri. Sidoo kale tan waxaa loogu yeeraa DUI ama DWI.

- **Hayssho ama isticmaal daroogo oo ay ku jirto mariwaanaddu.** Isticmaalka mariwaanaddu waa ka sharci Minnesota. Laakiin waa sharci-darro marka la eego sharciga dowladda dhexe. Laanta Socdaalku waxa ilaalisaa sharciga dowladda dhexe. Haddii bilays deegaankaagu uu u sheego hay'adda ICE inaad mariwaano haysato, waxa ay taasi saameyn kartaa sharcigaagga.
- **Xatooyadda.**

## Sharcigayga aan iminka haystaa khatar kale ma i gelin karaa?

Cid walba oo aan ahayn muwaadin Mareykan (U.S.) ah waxa ay khatar u tahay in la masaafuriyo haddii ay gaystaan qaar ka mid ah noocyadda dambiyadda. Fahmidda heerka khatarta ee arrintaa waa ay adag tahay. Waxa ay ku xiran tahay nooca dambiga, meesha aad joogto iyo nooca sharcigaagga. Hoos waxaa ku qoran tusaalayaal ah waxa dhici kara. Laakiin suurtgal ma aha in laga hadlo xaalad walba oo suurtagal ah. Waayo waa ay adag tahay, mar walba waa ra'yi fiican inaad degdeg ula tashato qareen. Barta LawHelpMN waxa ku jira liis ah qareemo ku caawiyn kara. Gal: [lawhelpmn.org/providers-and-clinics](lawhelpmn.org/providers-and-clinics).

### Haddii aadan sharci lahayn

La kulmidda bilaysku waxa ay keeni kartaa in ay ku xirto hay'adda ICE. Taasina waxa ay bilaabi kartaa habka ka masaafurinta dalkan. Taa waa dhab hadii xataa lagu xiray laakiin aan lagugu soo eedayn dambi. Waxaa dhici karta inaad ku jiro goobta haynta dadka ee hay'dda ICE inta aad sugayso dacwada. Wax badani waxa ay ku xiran yihiin inta ay bilayska deegaanku ay la shaqeeyaan hay'adda ICE. Uma badna in tigidh lagu siiyey uu keeni karo in maxkamadda laanta socdaalka ay kugu geyso magaalo magansi bixisa. Minneapolis aiyo St. Paul waa magaalooyin magansi bixiya.

### Haddii aad haysato sharci ku meelgaar ah.

Kooxdan waxaa ku jira noocyo badan oo sharciyo ah. Waxaa ku jira Martabadda Ilaalinta ku Meelgaarka ah (TPS), fiisaha-U (U-Visa), Fal Dib uga Dhiga, fiisayaasha H-1B, fiisayaasha ardayda. Saameynta xiritaanadda, ku eedyanta ama ku helida dambiyaddu waxa ay ku xiran tahay sharciga ku meelgaarka ah ee aad haysato. Sidoo kale waxa ay ku xiran tahay nooca uu yahay dambiga lagugu soo oogay. Qaar ka mid waxyaabaha dhici karta waa:

- Inaadan awoodin inaad cusboonaysiiso sharciyada ku meelgaarka ah.
- In sharciga lagaa qaado.

- Waxaa dhici karta inaadan ka wareegin sharci ku meelgaarka ah oo aadan u wareegin sharci rasmi ah.
- Waana lagu masaafurin karaa.

Haddii lagu xiro ama laguggu soo eedeeyo dambi, ula tasho qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan sidda si ugu dhaqsaha badan.

**Hadii aad haysato sharci degananansho ah (Green Card)**

Caadiyan, cidii haysata sharci degaansho rasami ah (Green Card) kaliya waxaa la masaafurin karaa haddii ay gaystaan dambiyadda waaweyn qoorkood. Dambiyaddaa waxaa ku jira gacan-qaadka qoyska dhexdiisa ah, ama jabinta amar maxkamadeed oo qof amaan siin ah, faraxumeynta, masuqmaasuqa, hubka, xatooyada iyo dambiyadda la xiriira maandooriyeyaasha. Hadii aad sharci deganaansho ah leedahay (Green Card), **laguuma** masaafurin karo jabin sharciga wadooyinka awgood oo aan cidna wax ku noqon. Kuwaa waxaa ku jira wadid gaari aan caymis ku jirin, wadid gaari laysin la'aan, gaari xawaare sare ku wadid, ama jabin xeerarka gaabaha wadada ah ee gawaarida la dhigto.

# Helidda Talo Dhanka Sharciyada Laanta Socdaalka (Immigration) ah Haddii Dambi lagugu soo Eedeeyo

## Maxaan sameeyaa haddii dambi la igu soo eedeeyo?

- Waydiiso bilayska inaad la hadasho qareen sharciyadda dambiyadda yaqaan. Waxa aad xaq u leedahay qareen sharciyadda dambiyadda yaqaan wax kasta ha noqdee sharciga wadanka aad ku leedahay. Haddii aad danyar tahay, maxkamadda ayaan kuu keeni qareen bilaash ah. Qareenkaa waxaa la yiraa qareenka difaaca dadweynaha.
- Ha ka jawaabin wax su'aalo ah oo bilaysku ku waydiiyo oo ku saabsan sharcigaagga. Waxba ha dhihin, hana saxiixin waxba, hana gaarin wax go'aan ah qareen la'aan.
- Waydii qareenkaaga dambiyadda sidda ay dambi ku soo eedayntu u saameyn karto sharcigaagga.

## Waa maxay faraqa u dhaxeeya qareenka dambiyadda qaabilsan iyo qareenka sharciyadda laanta socdaalka (immigration) qaabilsan?

**Qareenka dambiyaddu** waxa uu ku difaaci haddii dambi lagugu soo eedeeyo. Maxkamaddu waa khasab inay kuu keento qareen dhanka dambiyada qaabilsan. Qareenka dambiyadu:

- Waa khasab inuu kuu sheego sidda dambi ku soo eedayntu iyo wixii dambi qirasho ahi ay u saameyn karaan sharcigaagga.
- Waxa uu la shaqeyn karaa qareen sharciyadda laanta socdaalka qaabilsan. Waxa uu kaa caawin karaa inaad fahanto sidda dambigu uu u saameyn karo sharcigaagga.
- Waxa uu u dagaalami karaa inuu cawaaqibka ugu  fiican cawaaqiyadda kaaga soo dhiciyo maxkamada dambiyadda.

**Qareenka laanta socdaalku** waxa uu kaa caawin inaad gaarto go'aanka ugu fiican go'aanadda ee ku saabsan sharcigaagga. Waxa uu ku difaaci karaa xilliga qaadida dacwooyinka laanta socdaalka. Haddii dambi lagugu soo eedeeyey qareenka laanta socdaalku:

- Waxa uu la hadli karaa qareenka dambiyadda si uuga caawiyo inuu fahmo sharcigaagga.
- Waxa uu u sheegi karaa sidda ku helida dambiyaddu ay dhici karto inay u saameeyaan sharcigaagga.
- Waxa uu ku siin karaa talo fiican kolka aad daacad uga waranto taariikhdaadda fal-dambiyadda oo dhan.

Hadii aad jaa la  shaqeynayso qareen sharciyadda laanta socdaalka qaabilsan, u sheeg, in dambi lagugu soo eedeeyey. Waxa uu kala shaqeyn karaa qareenkaaga qorshe.

## Maxaan sameeyaa haddii dambi la igu helo?

**La tasho qareen sharciyadda laanta socdaalka yaqaan!**

Cid walba oo aan ahayn muwaadin Mareylkan (U.S.) waa inay la tashataa qareen yaqaan sharciyadda laanta socdaalka haddii lagu helay dambi. Qareenku waxa uu kuu sheegi karaa sidda dambi ku heliddu ay u saameyn doonto kiiskaaga wadan ka saarid ah. La tasho yaqaan sharciyadda laanta socdaalka ka hor inta aadan u safrin dibadda Mareykanka (U.S.). Barta LawHelpMN waxaa ku jira liisa qareemo ah oo ku caawin kara. Mari koodka (QR) ama gal: [lawhelpmn.org/providers-and-clinics](lawhelpmn.org/providers-and-clinics)

Haddii aad dalbanayso wax nooc sharci ah oo laanta socdaalku bixiso ama aad iska difaacayso dacwad masaafurin ah oo kaaga furan laanta socdaalka:

- **La hadal qareen yaqaan sharciyadda laanta socdaalka.** Waydii qareenka sidda dambi ku heliddu ay u saameyn karto codsigaagga ama kiiska masafurinta ah.

- **Soo aruuri dukumiintiyadda cadeymaha ah ee cadeynaya inaad qof fiican tahay.** Taasi waxaa laga yaabaa inay xoojiso kiiskaaga.  Barta LawHelpMN waxa ay haysaa warqad xog aruursan ah oo ka hadasha soo u aruurin daliilo maxkamado laanta socdaalka. Gal mareegta: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/preparing-evidence-and-testimony-immigration-court.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**